



Hanjabaadaha Bambooyinka

Hanjabaadaha bambooyinka waxa badanaa laga sheegaa telefoon, waxa kale oo laga yaabaa in lagu helo qoraal, warqad ama iimayl ahaan. Dhammaan hanjabaadaha bambooyinka waa in laga soo qaado arrin aad u culus oo loola dhaqmo sidii uu wax qarxaya ku jiro dhismaha.

Goobtaada shaqadu waa inay leedahay qorshe loogu talagalay inuu kuu sheego wixii la sameyn lahaa marka la helo hanjabaad bambo.

- Haddii aad heshid hanjabaad bambo, qofka ku soo wacay ka hel war badan in alaale intii aad ka heli kartid ee suurto gal ah.
- Xusuus qorid samee ama hadalkiisa qor marka aad qofka kula hadlaysid teleefonka. Qofka ku soo wacay ku hay khadka, oo qor wax kasta oo la yidhaahdo. U fiirso sanqadha agagaarka qofka, sifooyin cod oo gaar ah, muusig, mishiino ama codad kale.
- Haddii aad shaqada joogtid, qof kula shaqeeya isla markiiba ha waco 9-1-1 iyo nabadsugidda dhismaha. Qorshee sida aad u ogeysiin lahayd qofka kula shaqeeya.

- Haddii aad heshid hanjabaad bambo, ha taaban xidhmo/baako shaki leh.
- Ha la faaruqiyo agagaarka xidhmada ama baakada shaki leh, oo isla markiiba ogeysii boliiska.
- Marka laga qaxayo ama laga cararayo dhisme, iska ilaali inaad hor joogsatid daaqadaha ama aagaga kale ee suurto gal ahaan halis ah.
- Ha xanibin dariiqa lugta ama aagaga kale ee ay isticmaalaan saraakiisha degdeggu.
- Haddii aad heshid bambo, ha taaban ama ha isku dayin inaad dhaqajisid. Gargaar u waco oo isla markiiba ka bax aagga.

Liiska Hubinta ee Hanjabaadda Bambo

Wakhtiga soo wicitaanka oo sax ah:

Ereyada soo wacaha oo sax ah:

SU'AALAHAA LA WEYDIYO:

1. Goorma ayay bambadu qarxaysaa?
2. Halkee bay taala bambadu?
3. Sidee bay u eg tahay?
4. Waa maxay nooca bambadu?
5. Maxaa keeni doona inay qaraxdo?
6. Ma adigaa dhigay bambada?
7. Waa maxay sababtu?
8. Halkee baad iga soo wacaysaa?
9. Waa maxay adreeskaagu?
10. Waa maxay magacaagu?

CODKA SOO WACAHA (goobo gali dhammaan inta khuseysa)

Degan	Gaabinaaya	Ooyaya	Isku darsan	Haddii uu kuula muuqdo
Haghago/Shigshigo	Cod weyn	Qaylo	Googa'aya	inaad garanaysid, waa kuma
Qosol	Lahjad	Xanaaqsan	Degdegdan	qofka codkiisa aad moodid?
Giigsan	Sanqo	Carab-la'	Kacsan	Ma jireen sanqadho ka
La qariyay	Daacad	Xiiq	Caadi	baxayay agagaarka soo
				wacaha?

Faalooyin:

Qofka ka jawaabay soo wicitaanka:

Lambarka teleefonka ee laga qabtay wicitaanka:

Taariikhda:



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-017
Somali